

## 6 Shay oo Ay Tahay Inaad Ka Ogaato Hirgalinta Aqoonta

### Waa maxay hirgalinta aqoontu?

Hirgalinta aqoonta waxa lagu qeexaa tirada ardayda ee keenaya heerka waxqabadka ee 3 ama 4, (la buuxinaya ama dhaafaya filashooyinka gobolka) ee Qiimaynta Waxbarashada ee Maine (MEAs).

### Maxay hirgalinta aqoontu muhiim u tahay?

Qorshaha istiraatijiyyada ee Maine waxa ay ujeedadeedu tahay inay ka qalinjabiyaan dugsiga sare ee goobta shaqada loogu diyaar garoobo; hirgalinta aqoontu waa arrin aad ugu muhiim ah habka xisaabtanka ee gobolka.

### Maxay Maine u samaysaa hirgalin aqooneed?

Xeerka Federaalka ee Guusha Arday Kasta (ESSA) waxa uu uga baahan yahay gobol kasta in hayso hab isla xisaabtan kaasi oo ay ka dhigaya hirgalinta aqooneed mid muujinaya horumarka iyo guusha dugsiga.

### Waa maxay ujeedada guusha ee Maine?

Mid kasta oo kamid ah tirada guud ee ardayda, halkaasi oo ay joogaan in kabadan toban kun oo arday, waxa ay leeyihiin ujeedo ah inay kordhiyaan hirgalinta aqoonta 20% 2030.

### Halkay xogtani ka timid?

Xogta hirgalinta aqoontu waxa ay ka timid Qiimaynta Waxbarashada ee Maine (MEAs). Heerarka saddex ilaa siddeed, xogtani waxa ay ka timid qiimaynta eMPowerMe ee xisaabta iyo ELA SAT waxa ay siisay xogta ardayda sannadkoodii 3 aad ee dugsiga sare.

### Sidee buu u eegi doonaa kaadhka warbixinta ee ardayga?

Dugsigu waxa uu heli doonaa qiyaas hawlqabad ee ELA iyo xisaabta lana xidhiidha sida tirada guud ee ardaydu ay u buuxiyaan filashooyinkii hirgalinta gobolka.